Policy Briefing

HIPS

# Wadahadalka Soomaaliya iyo Somaliland

**Wada-hadalladii dhawaan Dowaladda Federaalka Soomaaliya iyo Somaliland ku dhex maray dalka Turkiga waa tallaabo yididiilo leh oo loo qaaday dhanka dib-u-heshiin siyaasadeed. Sidaas oo ay tahay, ilaa iyo hadda wada xaajoodku wuxuu u muuqday mid aan xaajada hoos loogu degin, xawaare debacsanna ku socda. Labada dhinacba waxaa la gudboon in ay qaadaan tallaaboyin cadcad oo ay ku war-gelinayaan kuna hawl-gelinayaan qaybaha bulshada ee talada wax ku leh, waxna ku kordhin kara sida hoggaanka dhaqanka, culumada diinta, ganacsatada ku nool Somaliland iyo Soomaaliya.**

**Madaxweynaha Somaliland Axmed Maxamed Maxamud "Siilaanyo" dhawaan waxa uu qiray in, inkastoo olole aan laga daalin ay Somaliland samaysay, haddana in ilaa iyo hadda uu aqoonsii noqday "mid la gaari waayey." Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud-na waxa uu si joogtaa ugu celceliyey in "midnimada qaranku" ay tahay mid kamid ah ahmiyadaha ugu horreeya ee maamulkiisa, sidaas darteedna wakhtiga dhow, rajada laga qabo ama fursadda ah in dowladda Soomaaliyeed ay aqbasho gooni isu-taagga Somaliland in ay tahay mid aad u yar.**

**Haddaba iyada oo arrimahaas maanka lagu hayo, labada dhinac waa in ay isku diyaariyaan kuna tala galaan wada-xaajood dheer oo adag. Somaliland iyo Soomaaliya waa inay ku dadaalaan in ay hantaan taageerada dadka Soomaaliyeed si wada-hadaladu ay u noqdaan, kuwo loo dhan yahay. Somaliland waa ay ku ammaanan tahay in ay wada-xaajoodka ay ka qayb galisey hoggaanka axsaabta mucaaradka ah. Dowladda Federaalku waa in ay wadahallada ka qayb-gelisaa xubnaha ka soo jeeda Somaliland ee ka soo horjeeda goosashada. Xididdada khilaafka labada dhinac waa kuwo hoos u qodan oo ku baahsan bulshada, haddii la doonayo in wadahadaladu ay mira dhalaanna, waa in si dhab ah bulshadu u wada hadlaan.**

**Sidoo kale, si wada xaajoodku u noqdo mid guul laga gaaro, labada dhinac waa in ay billaabaan tallaabooyin kalsoonida lagu dhisayo. Is-dhexgalka iyo wada shaqaynta aqoonyahanka, ganacsatada, bahda isbooritga, hidaha iyo dhaqanka ee Soomaalida labada dhinac waa in la dhiirri geliyaa. Ballan-qaadyadii ay labada dhinac ka galeen in ay ka wada shaqaynayaan la dagaallanka burcadda iyo argagixisada waa in sida ugu dhakhsaha badan loo dhaqan geliyaa.**

**Cabashooyinka Somaliland ee salka ku haya xad-gudibyo iyo tacaddi horreeyey waa in laga garaabaa, sida ugu mudanna looga xaal-marsiiyaa. Sidoo kale waa in dabaanad-qaadyo dastuuri ah la dhqan geliyaa, si loo xaqiijiyo in aan khaladaadkii horay u dhacay dib loogu dhicin; dhanka kalana Somaliland waa in aysan ka gar-waaqsataa dooniddii ahayd in ay ka go'do Soomaalida ay noqotay mid la gaari waayey.**

## Gogol-dhig

Ingiriiska ayaa xukumayey Somaliland, ka hor intii aysan xorriyadda helin 26-kii Juun 1960-kii. Shan maalmood kaddib Koofurta Soomaaliya oo Talyaanigu u talinayey ayaa xorowday, labada dhinac ayaana midoobay oo samaystay Jamhuuriyadda Soomaaliya. Shacabka Somaliland iyo madaxdooda siyaasadeed iyagaa u dadaalayey midnimada walaalahooda Soomaaliyeed iyaga oo aan ku xirin wax shuruud ah. Soomaali badanna tallaabadaasi waxay u ahayd mid farxadeed, oo saameyn ballaaran, iyo weliba tallaabo weyn oo xoojisay waddaniyadda Soomaalida.

Jamhuuriyaddii Soomaaliyeed ee dhalatay waxay u hawl gashay in ay hir-geliso Soomaaliweyn iyada oo ku dadaashay in ay Jamhuuriyadda ku soo darto qaybihii maqnaa ee dadka iyo dhulka Soomaaliyeed. Ujeedadu waxay ahayd in la xoreeyo saddexda dhul ee Soomalidu ka degto Geeska Afrika lana abuuro Soomaaliweyn. Calankii markaas Jamhuuriyadda loo sameeyey – oo cirka u ekaa xiddig cad oo shan geesood ahna dhexda ku lahaa – waxa uu muyjinayey dareenka weyn ee jiray ee ku aaddanaa sida ay Soomaalida Jamhuuriyaddu u doonaysay in ay xorreeyaan saddexda gobol ee kale ee maqnaa, kuwaas oo kala ahaa Soomaali Galbeed oo Itoobiya haysatay, NFD oo ka tirsanayd Kenya iyo French Somaliland oo hadda loo yaqaan Jamhuuriyadda Jabuuti.

Dadaalladii aan kala go'a lahayn ee lagu doonayey Soomaaliweyn waxaa ka sasay deriska Soomaaliya gaar ahaan Itoobiya iyo Kenya, kuwaas oo ay ka go'nayd in aan waxba laga badalin qaabkii ay gumeystayaashu uga tageen xuduudaha, gaar ahaan markii ay arkeen waxa ay ugu yeereen dhulballaarisga iyo dulmiga Soomaaliya. Waxay labadaas dal istiraatijiyo ka dhigteen heshiis ahaanna u saxiixdeen in ay si wada jir ah isaga xakameeyaan Soomaaliya. Heshiiskaas oo la dhaqan galiyey 1963-dii, weli waa mid jira oo Kenya iyo Itoobiya ay isticmaali karaan mar walba oo ay dareemaan in ay khatar deg-deg ah uga soo wajaahan tahay Soomaaliya.

Sagaal sano markii ay ka soo wareegtay xorriyadda Soomaaliya, saraakiil ciidamada qalabka sida ka tirsan ayaa 1969-kii afgambiyey dowladdii sida dimoqraaddiga ah loo soo doortay, halkaasna kusoo afjaray masuqmaasuq baahsan, cakirnaan siyaasadeed iyo habacsanaan maamul. Xukuumaddii milateriga ee uu hoggaaminayey Jeneraal Maxamed Siyaasad Barre, horraantiiba waxay kasbatay taageerada shacabka gaar ahaan

markii la arkay dadaalladii ay ka gashay dhisidda hay'adaha qaranka, hirgalinta qorista iyo akhriska Afka Soomaaliga, la dagaallanka fakhriga iyo soo noolaynta magaca iyo macnaha dowladnimada Soomaalida.

Iyada oo ka faa'iideysanaysa taageerada shacabka, ayay dowladdu 1977-dii waxay qaadday tallaabo gadaal ka noqotay khamaar markii ciidanku ay duullaan lagu xoraynayo Soomaali Galbeed ay ku qaadeen Itoobiya, guul hore kaddibna si cad la soo jabiyey, halkaas-na dhaawac uu ku gaaray kalsoonidii dadka Soomaaliyeed, taas oo keentay kala shaki ciidamadii dalka haystey.

1978-dii qaar ka mid ah saraakiisha dalka ayaa isku dayey afgambi, inkastoo aysan talada la wareegin haddana waxay ku guulaysteen in ay sii wiiqaan mooraalka ciidamada qalabka sidey, taas oo keentay in Madaxweyne Maxamed Siyaad Barre uu ka kalsooni baxo in badan oo ka mid ah saraakiisha sare ee ciidamada, talana uga dhammaatay in uu qoyskiisa iyo qaraabadiisa miciin bado. Iyada oo ka faa'iideysanaysa fursaddaas ayaa Itoobiya u hawl-gashay in ay dhaqan-geliso hadafkeedii ahaa in ay kala furfurto salkana dhulka ugu dhufato qaranka Soomaaliyeed. Siyaasiyiin iyo saraakiil caraysan ayaana u goostay Addis Ababa, halkaas oo ay ku yagleeleen jabhado hubaysan oo mucaarad ku ah maamulkii milateriga.

Toban sano kaddib, mid ka mid ah jabhadaas hubaysan – SNM – waxay dagaal hubaysan woqooyiga Soomaaliya kula gashay ciidamada dowladda. Xukuumaddii Siyaad Barrana iyada oo isku dayeysey in ay ka adkaato SNM waxay ku dhaqaaqday dhuqayn aan loo meel deyin oo ay la beegsatay Hargeysa, in bandanna magaalada dumisey.

## Cabashooyinka

Muddo yar kaddib burburkii dowladnimada Soomaaliya ee 1991 ayay Somaliland ku dhawaaqday gooni isku taag. Guurtida iyo madaxda siyaasadda oo ka socday qaar kamid ah beelaha deegaammadaas ayaa isla sanadkaas ku kulmay Burco. Laba qodob oo muhiim ah ayaana ergooyinkii Shirkii Burco isla qaateen: 1) in beelaha isla dega Somaliland ay dhexdooda ka sameeyaan dib-u-heshiin. 2) in midnimadii ay Soomaaliya la lahaayeen ay ka laabtaan, goonina isu taagaan. Waxayna isla arkeen in xasuuqii iyo xad-gudubkii dadka ku nool Somaliland lagu gaarsiiyey magaca dowladda Soomaaliya ay ku khasabtay Somailland in ay Soomaaliya ka go'do.

Dhibbanayaashii ay gaareen xadgudubyadii xukunka milateriga waxaa gaaray tacadiyo mudan in laga garaabo. Hay'adaha u dooda xuquuqda iinsaanka ayaana xaqiijiyey in dowladda Soomaaliya ay dil iyo dhaawac baahsan u geysatay shacab aan waxba galabsan. Dagaalkii dowladda Siyaad Barre ay ku qaadday jabhadda SNM waxa uu ahaa mid ka ka baxsan ama aan u aaba-yeelin xeerarka caalamka isla oggol yahay ee dagaalada.

Dhammaadkii 1980-madii dowladdii Madaxweyne Siyaad Barre waxay noqotay mid qabyaalad ku dhisan, beelo badan ayaana awoodda maamul iyo siyaasadeed laga fogeeyey. Taasina waxay dhalisay in jabhado beeleedyo badan ay soo koobeen awooddii dowladda, taasina Madaxweynuhu wuxuu uga jawaabey siyaasad qaybi oo xukun ah iyo isku jeedinta beelaha. In badan oo ka mid ah Soomaalidii woqooyi ku noolayd waxay dareemeen in aan laga rabin dalkii ay iyagu si niyad ah ugu biireen una dhiseen wax bandanna u hureen.

Ictiraafka eedahaas fure ayuu u noqon karaa in la heshiiyo, ugu danbayna dib loo midoobo. Madaxda Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo shacabka Soomaaliyeedba waa in ay diyaar u noqdaan in ay ka garaabaan, kana gar baxaan cabashooyinkaas si loo helo midnimo qaran.

## Guulo

22-kii sano oo Somaliland ay goonida u taagnayd waxay gaartey guuulo sarreeya, iyada Soomaaliya inteeda kale ay u badnayn mid muquursan colaad iyo xasilooni-darro. Somaliland waxay hir-gelisey hay'ado dowladeed oo shaqeeya oo taabbo galiyey in amni iyo kala dambayn ay ka hirgalaan deegaannadaas. Waxay qabteen doorashooyin badan oo madaxweyne, kuwo baarlamaan iyo kuwo deegaan. Doorashadii ugu dambeysey ee madaxweynaha-na si nabad ah ayaa xukunka loola kala wareegay, arrintaas oo ahayd arrin ka sarraysa waxa ka dhaca inta badan qaaradda Africa. Nidaamka ku dhisan xisbiyo aan qabiil ku dhisnayn oo loo dhan yahay ayaa lagu dhigay dastuur afti dad-weyne lagu dhaqan geliyey. Kaalinta haggaanka dhaqanka qudheeda dastuurkaa ayaa caddeeyey iyada oo Guurtida loo sameeyey Aqalka Sare ee Baarlamaanka.

Xagga bisaylka siyaasadeed, sida maamulka Somaliland uu uga horreeyo dowladda Federaalka Soomaaliyeed, waxay ka muuqatey dadka ay ku casuuntay inay ka mid noqdaan wafdiga Somaliland ee ka qayb-galay shirkii Ankara. Sidii shirarkii horaba, dowladda Somaliland waxay siyaasiyiinta xisbiyada macaaradka ay ku dartay in ay ka qayb-qaataan wadahadallada, halka wafdiga dowladda Soomaaliya uu ahaa mid ku kooban masuuliyiinta dowladda, oo aaney bulshada inteedii kale ku jirin.

Dhinaca dhaqaalaha, Somaliland waxaa ka jira ganacsi magac iyo mug leh gacanna ka geystey xasilloonida marka la eego canshuuraha dowladdu ay ka hesho iyo abuurista shaqo ee shacabka. Shirkadda ugu weyn xawaaladdaha Soomaalida, Dahabshiil, waxaa xarun u ah Hargeysa. Dhanka waxbarashada Somaliland waa meel rajo weyn laga qabo waxaana ku yaalla qaar kamid ah jaamcaddaha ugu maga dheer Soomaalida; inkasta oo aysanna icitiraaf caalami ah helin, Somaliland waxay ku tallaabsatay guulo lagu faani karo, iyadoo isku tashatay.

## Caqabado

Ka sokow guulaha aan xusnay oo ah kuwo lagu naalloon karo ee ay Somaliland gaartay, haddana waxaa jira caqabado Somaliland horyaalla. Ugu horrayn, baadi-goobka aqoonsi caalami ah waxa ay in badan oo dadka Somaliland ah ka dhigtay kuwo halkaas arrintii ay uga dhegtay, isla markaana moog isbaddellada kale ee gobolka ka socda. In badan oo siyaasiyiinta Somaliland ka tirsan waa fahamsan yihiin in qaddiyadda gooni isu-taagga, ugu yaraan hadda, ay tahay mid aan suurta geli karin. Waaana caddahay in Somaliland ay ku guul darraysatay in ay gobolka, iska daa adduun weynaha-e, ay ka kasbato gacan siyaasadeed ama aqoonsi.

Midowga Africa wuu ka warwareegay in uu si dhab ah u eego in ay Somaliland mudan tahay aqoonsi. Maraykanka iyo Ingiriiska – oo la oran karo waa dowladaha ugu dhawaa Somaliland – si aan laalaab lahayn ayay ugu cel-celiyeen in ay aqoonsan yihiin dhawrsanaanta midnimada Soomaaliya. Qaramada Midoobay si joogto ah ayay ugu celcelisaa xurmeynta midnimada iyo qarannimada Soomaaliyeed.

Tan labaad, sanooyinkii ugu dambeeyey, colaado qabaa'il ayaa ka aloosnaa deegaanno kamid ah Somaliland sida Awdal iyo dhanka bari sida Sool iyo Sanaag. Dad badan ayaana dagalladaas ku waxyeelloobay. Qayb ka ahaanta ciidamada Somaliland ee dagaalladaas waxay khatar ku tahay nabadda iyo xasiloonida gobolka; shaqaaqooyinkiina waxay iska beddeleen dagaal qabiil, waxayna yeesheen sawir ah in hal qabiil uu qabaa'ilka kale ee gobolka ee aan goosashada

oggoleyn uu muquuninayo.

Arrinta saddexaad, in dhawaalaba Somaliland waxay xir-xiraysey dadka si cad u taageersan midnimada Soomaaliya; iyada oo cabsi gelin iyo handadaad-ba ugu khasbaysey dadkaasi in ay ku dhiirran kari waayaan waxa ay aaminsan yihiin iyo midnimo Soomaaliyeed. Sanadkii 2000, baarlamaanka Somaliland ayaa sharciyeeyey xeer ka mamnuucaya xubnaha dowladda, bulshada rayidka, iyo shacabkaba in ay ka qayb-galaan shirk ku saabsan Soomaaliya. Taasina waxay keentay in xubno badan oo ka mid Dowladda Federaalka Soomaaliya in aysan booqan karin qoysaskooda iyo saaxiibadooda ku sugan Somaliland iyaga oo ka cabsi qaba xabsi. Siyaasaddaasi waa mid arxan darro iyo afduub ka muuqo aanna shaqeyn karin.

Midda afaraad, xorriyadda saxaafadda si joogto ah ayay Somaliland cabburin ugu haysayaa. Inkastoo marka dhan laga eego dhaqan saxaafad xor ah uu ka jiro Somaliland, haddana dowladdu waa ay hor istaagtay in Somaliland ay sameysmaan idaacado madax bannaan. Somaliland waxay ku doodday in idaacado gooni loo leeyahay ay xasiloonida wax u dhimayaan. Ka hor-istaagga shacabka Somaliland in ay helaan kuna shaqeeyaan waxa xaqooda ah oo ah in ay helaan saxaafad xor ah, waxay muujinaysaa in dowladda Somaliland ay tahay mid ku xadgudbaysa xuquuqda shacabka dul-qaadna aan lahayn. Sidaas oo ay tahayna, waxaa Somaliland ka jira 16 wargeys oo maalinle ah oo kasoo baxa Hargeysa, afar talefishin oo gooni loo leeyahay iyo mid dowladdu leedahay; talefishinada kale ee Soomalidu leedahay sida Univeral, Somali Channel, Royal TV iyo S24 dhammaan Hargeysa waxay ku leeyihiin xarumo waxaana u jooga wariyayaal uga soo warrama deegaanada Somaliland.

## Xiisadda wahadalka

Sida ka muuqatay war-murtiyeedka Ankara ee la sii daayey kaddib gunaanadkii shirkii Turkey, waxa muuqata kulankaas hore, in labada dhinac ay doorteen arrimihii fududaa ama aan xanafta lahayn. Wixii ugu weynaa ee kulankaas ka soo baxayna waxa uu ahaa in lagu heshiiyey in mar kale la kulmo. Inkasta oo aan la dhayalsan karin ahmiyadda ay leedahay kulankii ugu horreeyey oo ka-fool ka-fool ah in uu labada madaxweyne ku dhex maro goob ay raalli ka wada yihiin, haddana, waa wax la saluugo in arrimihii muhiimka ahaan aan wali laga wada hadlin, ajandahana lagu darin. Sidoo kale in saddex bilood kaddib loo madlay kulanka xiga waxay muujinaysaa sida aan labada dhinac midna deg-deg uga muuqan.

Wada hadalka labada madaxweyne xiisado ayay kiciyeen. In badan oo woqooyiga kasoo jeeda midnimadana aaminsan una ololeeya waa ay ka caroodeen in aan wadahadalkaan xaasaasiga ah laga tala gelin. Waxay farta ku fiiqeen wafdiga Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya wadahadallada uga qayb galay, kaas oo ay hoggaaminayeen siyaasiyiinta ay isku-jaalka yihiin Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud.

Walaaca dadka midnimada doonaya ee woqooyi ka soo jeeda, oo ah mid la fahmi karo, waa in siyaasiyiinta dowladda oo u nugul Somaliland ay sameeyaan tanasulaad aan dan ugu jirin midnimo doonka woqooyiga. Dowladda Faderaalka ee Soomaaliya waa in ay shaki bixisaa midnima-doonka waqooyiga isla markaana waasicisaa xubnaha dowladdu u wakiilanayso wadahaalka intaan la gaarin wareegga labadaad ee wada-xaajoodka.

Wada-hadalladu waxaa kale oo ay xasaasiyad iyo shaki ka abuuri karaan Somaliland dhexdeeda, waayo Madaxweyne Siilaanyo waxaa Somaliland dhexdeeda looga arkaa siyaasi aan albaabka midnimaa xirin oo maskaxdiisu ay u furan tahay fikir kasta oo macquul noqon kara. Dhinacyada ku fogaaday mabda'a goosashada ee Somaliland, doorbiin ayay Madaxweyne Siilaanyo ku hayaan, iyaga oo eraygii ama tallaabadii uu qaado ka eegaya dabacsanaan, diyaarna ula ah in ay ku tilmaamaan khaa'inu waddan markii ay fursad ka helaan ama uu dabacsanaan u muujiyo fikradaha shaqayn kara.

## Gunaanad

Waa arrin ammaan mudan in maamulka Somaliland iyo Dowladda Federaalka Soomaaliya ay dib u billaabeen wa-dahadallo ay marti-gelisay dowladda Turkiga oo ah dowlad taageero weyn u muujisay ummadda Soomaalida, labada dhinac-na ay u arkaan dhex-dhexaad. Madaxweynayaal Xasan Sheekh iyo Axmed Siilaanyo-na geesinimo ayay muuji-yeen in ay kasii ambaqaadeen heshiisyadii labada dhinac ay horay ugu galeen Ingiriiska iyo Imaaraadka. Waana muuqa-taa in hadda la gaaray xilligii dib loo daari lahaa shumaca wada-hadalka iyo dib-u-heshiisiinta mar haddii Soomaliya ay ka soo kabanayso labaatan sano oo xasilloonni darro iyo midnimo la'aan ah.

Sidaas oo ay tahay, kol haddii laba kulan oo hore ay dheceen, waxaa habboonayd in kulanka saddexaad la guda galo arrimaha waaweyn ee la isku hayo. Waxaa la joogey xilli ay ahayd in dardar cusub la geliyo wada-xaajoodka, saddex sano oo kaliya ayaa ka hartay waqtigii labada madaxweyne.

Somaliland waa in lagu ammaano inay hoggaanka axsaabta mucaaradka ku dartay wafdiga wada-xaajoodka uga qayb galaya; Dowladda Federaalka Soomaaliyana waa ay u baahan tahay inay khibrad ka kororsato farsamo-yaqaanimadan oo ah mid muujinaysa bisayl siyaasadeed. Kulanka soo socda, Dowladda Federaalka Soomaaliyeed waa in ay wada-xaa-joodka Somaliland u saarto wakiillo lagu dhan yahay. Haddii labada dhinac midkood uu dhexdiisa iska haysto, uma badna in guul la gaari karo. Sidoo kale, dowladda Soomaaliya waa in ay wada tashi xeel dheer la yeelato dhammaan qaybaha bulshada in aysan guda gelin wada-xaajoodka kan xiga ee Somaliland.

Sidoo kale, Somaliland waa in ay xal u heshaa culaysyada dhankeeda ka jira. Ugu horrayn, waa in ay joojisaa ciqa-abta iyo culayska ay ku hayso midnimo-doonka woqooyiga. Gaar ahaan waa in ay joogsadaan cabburinta dadka ku nool deegaannada Sool, Sanaag iyo Awdal. Sidoo kale Somaliland waa in ay dadka midnimada Soomaaliya aaminsan kuna dhashay waqooyiga ay ka joojisaa xannibaadda, waana in ay tagi karaan meeshii ay doonaan.

Waxaa la sheegaa in Madaxweyne Siilaanyo uu u dabacsan yahay arrinta ah in Soomaalidu ay dib u midowdo. Haddii taasi ay jirto, waa inuu la yimaadaa istiraatijiyo lagu daaw-eynayo tabashooyinka dadka Somaliland laguna taabbo galinayo midnimo qaran. Waana in uu ogaadaa in hayaankii gooni isu taaggu uu dhalanteed yahay. Dadka Somaliland waxaa laga hor-istaagay gacantii ay caalamka ka heli la-haayeen, maaddaama gooni isu-taag aan la gaarayn lagu mashquuliyey. Aqoonsiga Maraykanka ee uu dhawaan siiyey Dowladda Soomaaliya ee Federaalka waxay sii xoojisay lama taabtaannimada xorriyadda dhul iyo qarannimo ee Soomaa-liya. Madaxweyne Siilaanyo waa inuu ku dhiiradaa dadka Somaaliyeedna u dhaqaajiyaa midnimo kale. Saxaafadda oo xor laga dhigaa ayaana taas horseedi karta. Haddii ay So-maliland ka sii socoto jiritaan la'aanta saxaafad xor ah, taasi waxay bar madow ku noqonaysaa sheegashada Somaliland ay sheeganayso in xoriyad dhulkeeda ka jirto ama ay xorriyad doon tahay.

## Talooyin

### Talooyin ku socda Dowladda Federalka Soomaaliya:

- Sii wad wada-hadallada aad kula jirto Somaliland iyada oo ujeedadu tahay isku-turid iyo wax-isku hambayn siyaasadeed iyo in la gaaro dib-u-heshiin umadeed.
- Sida loola xaajoonayo Somaliland ka tala gali dad matala qaybaha kala duwan ee bulshada.
- Xubnaha ka qaybgalaya wadahadalka ka dhig kuwo dadka arrintu khusayso ay ku dhan yihiin, kuna biiri midnimo-doon ka soo jeeda woqooyiga.
- Wada xaajoodka Somaliland u wakiilo dad magac leh oo loo soo joogsanayo, siyaasiyiin, ganacsato iyo culumada diinta.
- Diyaari qorshe dhamaystiran oo lagu heshiin karo daawaynayana gabood-falladii horay u dhacay.
- Aqbal kana garow cabashada iyo eedaha Somaliland, raalli gelinna ka bixi xad-gudubyadii lagu galay magaca dowlad Soomaaliyeed.
- Diyaar u noqo miiskana soo saar talooyin iyo fikrado xukunka lagu wadaagi karo kuwaas oo soo jiidan kara kuna dhiirri gelin kara siyaasiyiinta Somaliland inay ku baaqaan in dib loo midoobo.
- Dhiirri geli gacanna ka geyso in bulshada caalamku ay sii waddo taageerada Somaliland ee dhinacyada horumarinta iyo tayaynta amniga.
- Qaad tallaabooyin soo nooleyn kara kalsoonida, sida isku furidda ganacsiga, dhisidda kooxo cayaartooy oo labada dhinac ku midaysan yihiin iyo is-dhaafsiga xiriirka dhaqanka, fanka iyo waxbarashada.

### Talooyin ku socda Somaliland:

- Sii wad wadahadallada Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.
- Qaado kaalin nabad-doonnimo kana shaqee in si caddaalad ah xal loogu helo khilafyada ka jira beelaha Sool, Sanaag, Awdal iyo deegaanada kale.
- Wadahadal gobollada dariska kula ah si xal loogu helo xuduudaha aad isku haysaan.
- Laal xeerarka u diidaya siyaasiyiinta waqooyiga ee dowladda Soomaaliyeed ka tirsan in ay soo booqdaan qoysaskooda iyo asxaabtooda ku sugan Somaliland.
- Kala shaqee iskana kaalmaysta Dowladda Federaalka Soomaaliya la dagaalka argagixisada iyo burcad badeedda.
- Qaad tallaabooyin kor u qaadi kara is-aaminaadda sida isku furidda ganacsiga, dhisidda kooxo cayaartooy oo labada dhinac ku midaysan yihiin iyo is-dhaafsiga xiriirka dhaqanka, fanka iyo waxbarashada.

### Talooyin ku Socda Bulshada Caalamka:

- Joojiya is-barbar yaaca uu had-ba dal wada-xaajood u furayo Soomaaliya iyo Somailand teegeerana dadaalladda hal waddan oo labada dhinac ay u doortaan in uu u fududeeyo wada-xaajoodka.
- Dib-u-heshiisiinta ku dhiirri geliya waxqabad horumarineed iyo gacan qabad hawlaha ay labada dhinac isla qaban karaan sida arrimaha la xiriira dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.
- Ka hortaga qofkii, kooxdii iyo dalkii isku daya in uu carqaladeeyo isku soo dhawaashaha Soomaaliya iyo Somaliland.

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay. Iyadoo ah xaruntii maskax-maalka ee ugu horreysay Soomaaliya, hadafkeedu waa inay xog iyo saameyn ku yeelato jaan-goynta go'aammada siyaasiga ah, iyadoo u mareysa daraasado cilmi-baaris iyo falanqeyn ku saleysan. Machadku wuxuu kaloo doonayaa inuu ka qayb qaato hana-qaadka iyo hirgalinta dhaqan aqoon iyo cilmi-baaris ku saleynsan.

www.heritageinstitute.org • info@heritageinstitute.org

© MACHADKA HERITAGE EE DARAASAADKA SIYAASADDA, 2013